Golaha Wakiilada JSL

Waaxda Hadal Qoraalka

Opened: - 10:37 AM **Hansard No.22/3**

Kal-fadhiga 22aad

Fadhigii 11aad ***04/09/2013***

Warbixinta Wasiirka Wasaarada Madaxtooyada ee Xog-ogaal u noqoshada Xaalada Dalka ee uu Golaha Siiyay iyo Su'aalihii Mudanayaashu weydiiyeen

Gudoomiyaha:- sideynu u balansanayn waxaa manta fadhiga inala jooga Wasiirka Madaxtooyada Md. Xirsi X. Cali si warbixin inooga siiyo Hawsha qaranka u hayo, waaxaana ku soo dhoweynayaa Wasiirka si aan warbixintiis xog-ogaal noqoshada Xaalada dalka, ku soo dhowow Mudane Wasiir.

Md. Xirsi X. Cali:- **(38 min 09 sec)** Gudoomiye, Mudanyaal marka hore waxaan idinku salamayaa Salaanta Islaamka, Salaan ka dib, anigoo ixtiraamaya Xilka Qaranka u haysaan iyo muhiimada is xogwareysi Hay'addaha Qaranka iyo xisaabtanka markii loo baahdo, waxaan jeclahay inan halkan marka hore ka jeediyo Warbixin kooban oo ku saabsan hawlaha Guud ee aynu Qaranka u hayno haday tahay Nabadgalyada, Dhaqaalaha Caafimaadka, Waxbarashada iyo Waxyaabaha ama arrimaha Bulshada loo hayo, hadaan ugu horeysiiyo Nabadgalyada iyo halkey mareyso, waxaanse ka horeysiinayaa mar hadeynu nahay dad ku tiirsan Mubashir Xoolaha.

Xaalada roobkaka iyo abaaraha Xoolaha, Roobab badan baa dalka ka da'ay inkastoo qeybo dalka ka mida uu ku yaraa, laakiin inta badan Gobolada dalka roobab baa ka da'ay waxaa jirta oo xusud mudan marka xoolada la eegayo dad si fiican iyo si xunba u adeegsaday way jiraan. Balse xaga beeraha

Sidoo kale 10 kun oo askari oo ciidanka kala duwan ee dalka oo min alifle ilaa General ah ayaa darajooyin la siiyay, sidoo kale darajadooyin kaliya lama siine waxaa loo kordhiyay gunadii, Gune kala duwan oo ku qorshaysan darajooyihka ay hayaan min alifle ilaa janaral, sidoo kale lama dayicin dablihiina waa la xusay, oo maadaama aanu darajo ku kala-sarayn isna mishaarkii waa loo kordhiyay, taasoo macnaheedu tahay sanadkan iyadoo lagu salaynayo darajooyinka dabluhuna ka faaiidaysanayo in dhamaan ciidamada qaranka ee kala duwan ay gaadhay in gunooyin kor u-qaada wixii ay qaadan jireen ama ay ku noolaayeen.

Waxa xusid mudan in danbiyada guud ee dhici jiray ay hoos u dhigeen, waxa dhici kara in dadka qaar is yidhaahdaan dambiga kuugu culus baa adiga kuugu weyn sidaan Ciidamada warbixintooda ku hayno waxaa ka muuqda in dambiyada dalka ee dhaca maalin walba ay hoos u dhaceen, marka la eegayo sanadkii 2012kii waxay

ahaayeen 18,989 dambiyada dhacey, halkan marka la barbardhigo sanadkan ay ka marayaan iyado bishii 9aad lagu jiro 10-12 kun wax u dhaxeeya.

Dilalakuna laftoodu hoos bay u dhaceen, sidaan hore u xusey iyadoo qofkasta isleeyahay dambiga kugu weyn baa ugu culus, dilalku waxay ahaayeen sanadkii hore 77 dil, halka sanadkan aanay 40 gaadhin, waxaa ka muuqata inay hoos u dhaceen ilaahay bilaha hadhayna wixi xun ha inaga hayo.

Goobaha nabadgalyada saldhig boolis hanoqdaan ama rugo boolis ama kaantaroolo ha noqdaane waxaan jecelahay in aan carabka mariyo si aad xildhibaane uga bogadaan in shaqadii ay xukuumadu qaraka u haysay ay si wanaagsan u socdaan

- Maroodi-jeex 21 saldhig iyo 20 rugood
- Togdheer 26 sadhig iyo 15 rugood
- Awdal 11 saldhig iyo 7 rugood
- Saaxil 9 saldhig iyo 3 rugood
- Sanaag 14 saldhig iyo 5 rugood
- Sool 5 saldhig iyo 5 rugood
- **Total 76 saldhig iyo 55 rugood**

Marka rugaha lagu daro 32 kantarooll waxay noqonayaan 82 goobaha nabadgalyada.

Miisaaniyada marka dhaqaalaha laka hadlayo waxa laga qiyaasaa miisaniyada korodhka dhaqaale, anagoo ka duulayna qorshihii shanta sano (five years plan)ay xukuumadu samaysay markay xukunka la-wareegtay,waxaa dareemi karaysaa korodhka dhaqaale 40 ilaa 125 milyan iyo dawladaha hoose u laba laabmay waxan sidoo kale aan kordhinay xakamaynta musuqmaasuqa iyo la dagaalanka hanti lunsiga qaranka isa ka oo aanu hawlgalinay ka shaqynsiga hanti-dhawrka, iyadooy ay yartahay intoo shaqeeyay sadexda sanadood iyo qaabkuu u shaqeeyey oo aad ka garankarto number of cases ka dhacay hargaysa,gabilay burco iyo borame iyo dhamaan intii ay wax ka qabteen iyagoo wada maray dhamaan wasaaradaha iyo haayadaha kala duwan ee qaranka

marka laga hadlayo dhaqaalaha waxa saamayn ku leh lacagta, lacagta qaranka oo ku goobnayd meela dhaw oo aan odhan karayo marka sheikh la gaadho burco may gaadhaynin oo waxa ka shaqaynayay giinbaarta imikana gacanta lagu hayo gudoomiyihii baanku ku maqanyahay ceerigaabo gacanta lagu hayo in fulinta ceerigaabo ku shaqayso lacagta Somaliland lacag ku filana ay u daabaceen qorsheheegii iyo hanaankeedii, waxaan aaminsanahay dhaqaalaha in korodh badani uu gu kordhay waxaanad ka eegi karaysaa statisticska ay sameeyaan haayadaha ku shaqada leh.

Biyaha, marka laga hadlayo biyaha waa waxa noloshu ku tiirsantahay sida ilaahay SWT ku tilmaamay, biyaha Xukumadu xoog badan bay saartey inkastoo aynaan wali gaadhin baahidii inaynu dhameystirno, hadan waxaa lo qodey Ceelal badan sida:-

- Hargeysa waxaa laga qodey 14 ceel, waxanaa gacanta lagu hayaa babe lineka biyaha keenay ee Geed-deeble ka yimaada, waxaana dhameystirmey sahminitii lagu sameynayay, insha'alah waxaa laga yaabaa inuu bilaabmo qoditaankii iyo dhigitaankoodii, waxaa loo badalayaa bebkkana waa biyaha uu keenayo oo yar oo waxaa lagu badalayaa beeb keena 24mitir Quebec, waxaa kaloo la wadaa biyaha imanaya si magaalada meelaha aanu gaadhin u gaadhi lahaa.
- Togdheer waxaa la qoaday 12 ceel, waxaa waliba la raaciyay ceelasha qorshe cusud oo la yidhaa main systems oo aan ahayn meesha ceelasha laga qoday ee ah, ceelasha caadiga ah ee lagu rido waadaanta oo la daboolo laguna rikibo bam loona sahlo dadka xoolo dhaqatada ahi darar ay ka cabaan loona gaadhsiiyo Tuulooyinka yar yar manay wada gaadhin dalka, lakiin waa bilaw meel ficana way maraysaa Maroodi jeex 9 main system ayaa laga sameeyay, Togdheer waxaa iyana waxaa laga sameeya 17 main system, halka 17 ceel oo cusubna laga sameeyay
- Saaxil waxaa laga sameeyay 7 ceel iyo 7 main system.
- Sool waxaa la sameeyay 4 ceel iyo 12 main system ayaa laga sameeyay.
- Sanaag waxaa iyana laga sameeya 6 ceel iyo 13 main system ayaa laga sameeya

Marka la isu geeyo ceelasha guud ahaan la qoday waa 51 ceel gobolada oo dham, qorshaha hore-umarinta biyaha ee aan hore u tilmaamay ee Geed-deeble project ee ugu horeeyay waxaa lagu qiyaasaa ilaa 28 milyan oo ay xukuumadu u hawl gashay ayna inaga caawinayaa hay'adaha EU da iyo haayada kala duwan waxaa kale oo gacanta lagu hayaa 8 ceel iyo 10 main system gobolada kala duwan oo socda iyo biyo balaadhinta Burco, Borame, Ceerigaabo, iyo bigalinta loo diyaarinayo Wajaale intaba gacantaa lagu hayaa.
Maraan leenahay 51 ceel ayaa la qoday halka ay ka ahayd xukuumadii tan ka horaysay waxaa la qoday 89 ceel labaatan kii sano ee qaranku jiray halka ay noqonayaa ceelsha dalka ka qodayni 140 ceel.

Waxbarasha: - wax barasha aad ayaa loo tabo galiyay wax wayna waa laga qabtay 43% ayaa kordhay ardayda korna way u socdaan in kastoon sanadkan ayna so dhamaan Assesment kii ee ay ku joogto 2011 iyo 2012, waxaa kale oo wax wayn laga qabtay kordhinta Macalimiinta oo waxaa la kordhiyay 3232 macalin waxaa kale si kor loogu qaado tacliinta sare waxaa uu Madaxweynuhu sameeya Gudidda tacliinta sare, waxaanay dhamaystiree qiimayntii Jaamacadaha dalka ee lagu kala reebayay iyo qaabka ay u kala horeeyaan ee u kala qiimo badan yihiin, sidoo kale qiimaynta ardayda ee ay ku gali karaan maadooyinka kala duwan ee Jaamacadaha sida qofka galaya maada science, Arts, in aanay wax isu mid ah aanay ku galayn, ka dhakhtarka iyo management aanay wax isu mid aanay ku galin qorshaa oo dhamaystirana hay'da ayaa haysa iyada oo intaa ka faah'faahsana haayada ayaa la ga helayaa.
Deeqaha wax-barasho ee dalka dibadiisa laga helay waxaa ka mid ah Turkiga waxaa loo diray 84 arday, Sudaa108 arday ayaa loo diray, Yaman45 arday ayaa loo

diray, Malesia 23 arday ayaa loo diray, Kenya 15arday ayaa loo diray ethoipa 130 Uganda 15 arday ayaa loo diray Libya 29 arday ayaa loo diray ardayda guud ahaa la diray waxay dhan tahay 449 aday oo scholerships ah.
Deeqaha waxbarasho ee dalka gudihiisa aha waa 448 arday ayaa igana waxbarasho ka helay jaamacada dalka
Tirade dugsiyada dhexe ee inta ay dawladu joogtay soo kordhisay waa 166 dugsi waxaanay kala yihiin:-

1. Togdheer 46 dugsi
2. Maroodi jeex 64 dugsi
3. Awdal 21 dugsi
4. Saaxil 13 dugsi
5. Sool 8 dugsi
6. Sanaag 14 dugsi

Caafiamaadka:- caafimaadka oo halbawle ah waxaa laga qabtay hawl aad u balaadhan marka aan eegno sadexda darajo ee kala duwan ee cusbitaalada marka la sheegayo,

- Boorama waxaa ka shaqeeya 3 cusbataal, oo kala ah cusbataalka guud ka TBda iyo ka Salal ka shaqeeya ee Cusbataalka Guud.
- Maroodi Jeex waxaa ka shaqeeya 5 cusbitaal marka aan ka hadlo goboladii hore waayo waxaan joognaa golihii sharci dajinta oo aan wali la marin xeerkii gobolada.
- Saaxil 2 cusbitaal ayaa ka shaqeeya
- Togdheer 3 cusbitaal ayaa ka shaqeeya waxaan xusid mudan in hay'adii gacanta ku haysa ay ka baxday dhibaato aynaan inagu gasan waxaa kale oo dawladu ay samaysay gurmad oo bixisay kharashaadkii ku baxayay cusbitaaladaa in kastoo ay na bixin Karin karashii hay'adda oo kale
- Sanaag 4 cusbitaal ayaa ka shaqeeya
- Sool 3 cusbitaal ayaa ka shaqeeya

Cusbitaalada marka aam leeyaha waxaan u jeedaa darajada koobaal ee caafimaadka ee bulshada loogu adeego
Marka laga hadlaayo MCHs ama health centers waxaa shaqeeyaa gobolada dalka

- Awdal 22 MHCs ayaa ka shaqaynaya.
- Maroodi jeex 23 MHCs ayaa ka shaqaynaya
- Saaxil 11 MHCs ayaa ka shaqaynaya
- Togdheer 16 MHCs ayaa ka shaqaynaya
- Sanaag 12 MHCs ayaa ka shaqaynaya
- Sool 10 MHCs ayaa ka shaqaynaya

Waxayna isu dhan yihiin 104 halka ay cisbataaladu ka ahaayeen 20 cisbitaal
Marka laga hadlaay health post ama meelaha ugu yar yare e bixinkara adeeg caafimaad waa:-

- Awdal 36 health post ayaa ka shaqeeya
- Maroodi jeex 31 health post ayaa ka shaqeeya
- Togdhee 34 health post ayaa ka shaqeeya
- Saaxil 15 health post ayaa ka shaqeeya
- Sanaag 27 health post ayaa ka shaqeeya
- Sool 30 health post ayaa ka shaqeeya

Marka la isu wada daro waxau dhan yihiin tiro ahaan 173 ayay isu dhan yihiin marka aan eegno adeegyada dadka soo gaadhi waayo goobaha adeega Ambalasyada u shaqeeyaa waxay dhan yihiin gobolada oo ay ku jiraan ku cusub qaarkood :-

- Awdal 4 Ambalas
- Maroodi jeex 7 Ambalas
- Togdhee 4 Ambalas
- Saaxil 4 Ambalas
- Sanaag 4 Ambalas
- Sool 2 Ambalas
- Gabilay 2 Ambalas
- Daad-madheed1 Ambalas
- Salal1 Ambalas
- Hawd1 Ambalas
- Saraar 1 Ambalas

Marka la isu daro ambalasyada sheqeeyaa waa 24 Ambalas halka ay dawladu kula wareegtay 9 Ambalas

Cadaalada: - cadaalada oo aan odhan karo waxay halbawle marka laga hadlaayo dawlad nimada oo aan odhan karno marka cadaalad laga hadlaayo in tayada aqooneed kor loo qaado iyo dhaqaalaha kor loo qaado sida adeegayaasha cadaalada looga helo cadaalad waxaa ay xu kuumadu siiso dhaqaale wixii ay awoodaysay oo maxkamada sare waxay qaadan jiree 3milayan ayay qaadan jiree waxaana looga dhigay 7 ilaa 8 milyan wax ku dhaw looga dhigay, maxkamadaha waxay xukuumadu kula wareeg tay 97 maxkamadood hadana waxay gadhaan ilaa 154 maxkamadood.

Mushaharka marka laga hadlaayo Gobolka, Racfaanka, iyo dagmada iyagana korbaa loo qaaday oo waxbaa loogu daray dhamaantood aqoontoodana korbaa loo qaadaay, waxaa kale oo ay xukuumadu u hawl gashay ilaa 100 Qaadi oo ah dhalinyaradii ka soo baxday jaamacada waxaana la helay laba difcadood oo min 40 ah ayaa la tababaray ilaa hada oo ay bixisay dhaqaalihii ku baxaayay, waxaa kale ay aan samamay system la yidhaa Case management ayaa hayaa oo hargeisa ka socda oo haduu hirgalana wadanka oo dhan lagu bahaahin doono insha allaah, waxaa kale oo la dardar galiyay kuwa la yidhaa mobile court si cadaalada loo gaadh siiyo ku fogfog ee aan soo gaadhi Karin waxaana loo sameeyay xafiis iyo shaqaale.

Waxaa kale oo gacanta lagu hayaa wax la yidhaa case rewiew si case kasta oo dhacan looga dabatagi karo loona ogaan karo case kastaa in uu cadaalad u dhacay iyo in kale in kasta oo aanu wali dhamaystirnany oo gacanta lagu hayo, sida aad ka warhaysaa

cadaaladu waxay u kala baxdaa qaybo kala duwan maaha maxkamadaha oo kaliya maaha xaakin meel fadhiya oo kaliya marka laga soo bilaabo danbi baadhaha CIDa fadhiya, xeer ilaalinta, maxkamada Degmada, Maxkamada gobolka, Maxakamada Racfaanka, iyo Maxkamada sare intuba mushaharadoodii, tiradoodii iyo tayadoodiiba waa la kordhiyay.

Dhismayaasha Xukuumada hirgalisay intii ay joogtay

Waxaa kale oo aan xusayaa dhismayaasha ay dawladu hirgalisay si loo dhamaystiro hanaan ka iyo haykalka dawladnimo dhamaan waxaa la dhamaytiray ama gacanta la guhayaa:-

- Madaxtooyada oo la cusbonaysiiyay lana dhamaystiray
- Wasaarada Arimaha Gudaha
- Wasaarada Arimaha Dibada
- Wasaarada Kaluumaysiga
- Wasaarada Gaashaandhiga
- Wasaarada Shaqada iyo Shaqaalaha
- Wasaarada Dhalinyaarada iyo ciyaraha
- Wasaarada Xananad xoolaha
- Wasaarada Deeganka
- Wasaarada Duulista iyo Hawada
- Madarada Hargeisa iyo Beerbera

Doorajooyinka iyo diiwangalintii

- Waa la wadaa qorshihii civil register ka wasarada daakhiliga ayaana wada waxaa kale oo la wadaa is vote registerka oo isna ka dan bayn doona vicil regiter ka waxaa kale oo mar walba la eegayaa sida ugu macquulsan ee aan u hali karno dhaqaale.
- Doorashooyinka guurtida sharcigoodii baa la sugayaa oo cida sharciyada laga sugayo idinkuna qayb ayaad ka tihiin oo wali sharcigii ma dhamaystirmin.
- Sharciyada Wakiilada iyo Madaxtooyadana waa la qabanaya sidii madaxwaynuhu halkan ka balan qaday waxaa la qaban doonaa wakhtigedii insha allaahu tacaalaa waxanan rajaynaynaa in la dhamayndoono wixii sharciya iyo wixii farsamo ahba waxaana indin ka codsanayaa in aad nagala shaqaysaan.
- Waxaa kale oo aan idinka rajaynayaa in aan awooda isugu wada gayno qabashada doorasha maadaama ay dan caam ahi inoogu wada jirto si aanay dimuraadiyaduna hoos inooga dhicin.

Tahriibka:- Waxaa kale oo aan ka hadlayaa tahriibka oo ah dhibaaato iyo dhiigbax bulshada aad u saameeyay waxa uu madaxwaynuhu saray gudi kala shaqaysa arimaha aminga iyo tahriibka sidoo kalana qorshe u abuura gacantaana lagu hayaa,

waxaa sidoo kale laqabtay 380 qof oo dalka lagu soo celiayay dalka, waxa la soo xidhay oo xukuma kala duwan lagu riday 16 tahriibiye oo ah kuwa dadkeena dabada ka wada.

Waxaa kale oo lanoo sheegay in Ethopia lagu qabtay labadii u waawaynaa oo mudo aad u badan la daba socday oo la isla kaashaday dawladaha aan jaarka nahay

Arimaha Dibada:- Waxa ay dunidu u cimaamaday dawalad ku sheeg la buunbuniyay oo Somalia ka shaqaysay lakin Somaliland waxa ay kiraystay institution caalami ah oo kor u qada magaca Somaliland waxaa kale oo ay dawladu samay hay'adaha layidhaa Loping Agencies ama loping ferms si uga hawl galaan maraykan si ay ma geceena kor u qaadaan, waana ogtihiin in haday noqoto maraykan, ingiriiska, iyo carabahaba in meeqaamkii lagu qaabili jiray uu ka duwan yahay kii hore ee lagu qaabi li jiray oo markii ugu horaysay down strees lagu qaabilay Madaxweynaha oo aad ka war qabtaan.

Sidoo kale waxa ay xukuumadu furtay daaqad labaad oo ah wada hadalka Somaliland iyo Somalia oo sal u ah ictiraafka aan raadinayno oo ah in aynu daqad kale qaraacno ama aan goyno xujada ah maxaa u wada hadli weydeen in aan goyno, waan arkay dad badan oo ka hadlay wada hadalka, hadii uu wada hadalku macno lahaa waa lala hadlay hadii uu heshiis lala gala macno lahaa haana 4 ama 5 heshiis ayaa lala galay, hadii uu macno lahaa in la qaadacaana waa la qaadacay marka ilaa hadana waa loo balan san yahay wada hadalada.

Somaliland lama ictiraafin lakin dunidu way la shaqaysaa si toos ahna way dhaqaale way inoo siiyaan waxay dunidu inoo ogolaatay Somaliland Trust Fund oo loo sameeyay sanduuq wanan ku dari doonaa budget ka insha allah

Hadii aad is weydiinaysaan su'aasha ah imisaa ina soo gala Trust Fund ka iyo sida uu u qorshaysan tahay Lagac11 million ku qiyaasan ayay ahayd markii hore in kastoo ay ka cudur daarteen 1 milyan loogu talo galay ka luumaysiga waxay u qorshaysan tahay ama loo qorsheeyay sidan

- Xoolaha oo ah lafdhabarta dalkeena waxaa loo qorsheeyay in lagu horumariyo 3.1milyan
- Wadooyinka in lagu horumariyo 2 milyan.
- Deeganka in lagu horumariyo 1.6 milyan.
- Biyaha guud ee dalka in lagu horumariyo 1.5 bilyan.
- Biyaha Caasimada Hargeisa in lagu horumariyo 1.7 milyan.
- Kaluunka waxay u qorsheeyeen 1 million lakiin way ka cudurdaarteen sida aan hore u sii sheegay.

Wax soo saarka dalka:-

Hadii aan ku soo gabagabeeyo wax soo saarka dalka wax soo saarkeenu waxaa uu marayay 11% ayuu marayay sanadii 2010 waxaan la soo dagnaa oo ahayd markii ugu horaysay ee aan samayno, hada se waxaa uu marayaa wax yaabaha aan la soo baxnaa 16% waa sanadii ugu danbaysay in kastoon wali sanadan aan ku jirno aan la samayn markaa halkaa waxaa ka cad in aan wali aad u hoosayso oo aan nahay dad ku tiirsan waxyaaba dibada uga soo daga waxanan u baahanahay in aan dalkeena wax kala soo baxno si aan uga deeq toono waxyaahaba dibada inooga imaanaaya

Walaw aan wali la soo dhamaystirin waxaa sanadka la dhoofiayay

- Kaluunka 5 Kun oo tone ayaa la dhoofiyay ama la soo saaray
- Xoolaha waxay ahay sanadii 2011 2.5 milyan, sanadkii ugu danbeeyayna waxa ahayd 3 milyan oo neef ayay ahayd. Sanadan wali waa uu socdaa.
- Beeraha 60 Kun oo tan ayaa lagu qiyaasay wixii ka soo baxay oo ay xukuumadu samaysay wax ka yidhaa Food and woter security policy oo ku jahan sidii aan u heli lahayn biyo ku cunto iyo biyo ku filan.

Su'aalaha Mudanayaasha

Md. Cabdikariin Aw Cali Shabeel:-

1. Mudo dhawayd waxa dhacaday in degmo ka mid degmooyinka Somaliland ay soo galeen masuuliyiin ka tirsan maamulka puntland ay qudbado ka jeediyeen aniga oo ka turjumaya dareenka shacabka Somaliland manan arag talaabadii xukuumada oo aanu u arakaynay in lagu soo xad gudbay dalka Somaliland?
2. Halkan waxa aan ka gudbinay xeerka Sirdoonka oo ay ku dhaqmysay hayada sirdoonka oo ka mida hayadaha ugu waawayn ee wadanku ku shaqeeyo. Xeerkii muu kenin in ay ka shaqeeyan dhamaan ciidamada Somaliland sirdoonku sida aduunka. Somaliland waxa joogo taliyaayaal badan oo ka soo shaqeeyay sirdoonka oo laga reebay darajadii maxaad uga reebteen oo loo dalacsiin wayay?

Jawaabo: - Md. Xirsi X. Cali:-

1. Mudane C/karim wuu mahadsanyahay, marka laga hadlayo in Xuduudeenii soo galeen qolo puntland ahi waa xaqiiqo jirta runtii waa gardaro iyo daandaansi ay puntland ku soo qaadey xuduudaha Somaliland, waxaa sida dhaqankeenu ahaa dagaalku isagoo lama huraan, hadii xuduudaha Somaliland xadgudubka laga deyn dhamaan umada Somaliland maaha madaxweynaha ama ciidaanka ama shacabka oo kaliya ee waa dhamaan Shacabka Somaliland

dhiigooda ku difaaceyso, dagaalka laguma degdago laakiin haduu yimaado way ka qabtaa cidkasta awood Somaliland.

2. Arrinka Xeerka Ciidanka Sirdoonka ee darajada, Dabcan horta derajadii may dhamaan wax waa la bixiyay wayna soctaa, laakiin mid baa jirta su'aal la iska weydiinayo oo ah Sirdoonka derajada la siinayo sida aad idinkuba Xeerka Sirdoonka ee halkan ka gudbiseen Civil buu sheegayaa sidoo kale Taliyaha agaasime ayuu ku magacaabaya, Duniduna way ku kala duwantahay sirdoonka oo waxaa jira waxbadan dunida u isticmaala ciidan oo ay ciidan yihiin, sidoo kale waxbadan ay civil yihiin way jiraan, maadama ay yihiin sirdoon ama sida xeerku sheegayo wax ku shaqeeya civil, ama sidoo kale wakhtigan xooga aynu saareyno in ciidamada kala duwan ee sida Civilka u diyaarsan ee leh inta badan awooda sifaha xidhista iyo qabashada gacanta ay adeegsadaan waa Ciidamada Booliiska iyo Militeryga, markaa waxaynu awooda saareyney gacanta ay adeegsadaan xooga la saaro oo la dhiirigaliyo, laakiin qaranku isla gartona ma jirto cid diideysa, laakiin Xeerkii Sirdoonku sheegayona waa Civil.

Md. Cabdiraxamaan Maxamed Jamac

1. Markaad ka hadalaysay biyaha waxad soo qaday geed deeble oo waraabiya 50 % miyanay jirin meelo kale sida xunbo wayne oo aad ku soo koobtey qiime iyo assignment, waxaana nagu maqaalo ah in biyaha Geed-deeble lagu xoojin doono arrintaa wax nooga iftiimi?
2. Ciidamada RRU ee habeenkii guryaha u daadanaya maxaa u diiday in ay dadka la tuhunsanyahay la xidho, maalintii badhaan dadka?
3. Imisa hayadood baa la hoos keenay wasaarada madaxtooyada intii aad haysay?
4. Qorshaaha ma ku jirtaa in si gaar ah loo sameeyo hayad wadooyinka (Somaliland read authority) si loo soo celiyo kalsoonida dadka iyo hayadaha in dhaqaale loogaga helo?
5. Miisaniyada madaxtooyada oo aad u badan waa 51 bilyan sl/sh= oo u dhiganta 5 milayn oo dollar oo aanay mushaharka Madaweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenku ku jirin, maxaad wax ugag qaban waydeen doox yadan layay haldoorkii Somaliland?

Jawaab:- Md. Xirsi X. Cali:-

1. Su'aasha Ceelasha Biyaha waxaad xustey Geedeeble, Xumbaweyne waad xustey oo kaliya, runtii laba is le'eg maaha Xumbaweyne iyo Geed-deeble, projectga mark alga hadlayo beeb ayaa laga soo qaadaya xumbaweyne ilaa 18 km oo ilaa hagrgiesa la keenayaa waxaa loo diyarinayaa wixii soo qaadayay waxaana loo bahanyahay lacag ilaa 20 milayn oo dollar ah mana aha waxaan iska bixin karno, halka Xaraf oo aad bar-bardhigeysaana u baahanyahay 300 oo kun inay ku baxayso, waxaanu waraabinayaa 4 xaafadood oo waaweyn oo

masaakiin dad danyara ah oo xil inaga saaranyahay adna kaa saaranyahay oo u baahan in xooga la saaro markaa waxaan isleeyahay kaa xilbaa naga saran in loo doono wixii lagu hirgalin lahaa, kana waa la diyaariyay, geed-deeble waa project gaara xumbaweynena lagu dari-maayo Geed-deeble.

2. Su'aasha labaad ee maxaa RRU maxa loo adeegsada, RRU, SSPU iyo CTU ama ciidamada gaar u tababaran waa ciidamo gaar u ah inay la dagaalamaan argagaxisada oo ah cadawga Somaliland iyo caalamkaba, in habeen iyo maalinba la raadiyo cadawgana waa sax, sido kale marka ciidadma laga hadlayo qofka marka la qabanayo exibit baa lagu qabtaa isna guri buu yaalaa, markaa exibitka iyo wixii inta lagu qabto ayaa lala qaadayaa, wixii kale waa waxaan ku habooneyn public.

   Si aan xildhibaanada warbixin idiinka siiyona waxaa la qaaday 8 operation lixdii bilood ee u dambeysay waxaana lagu qabtey 22 eedeysane, waxaa sidoo kale 10 sano ayaa lagu xukumey 1 qof xukunkiisii dhacey laba kiis waa garsugayaal oo waxaa u xidhan 7 eedaysane, 2 kiis baadhistii baa socota walina dacwad may gaadhin 10 eedaysanena waa loo xidhay, 2 kiisna waa la siidaayay, ciidamadaasi waa kuwo u darban inay cadawgooda la dagaalamaaan oo qabtaan, waxaaana ku aamanayaa shaqada ay qabtaan, waxaa Golahan hortiisa ka mahadinayaa Ciidamada Booliiska dhacdoyinkii badhiseed ee ay qaadeen ay ku qabteen lacag iyo dahab aad u farabadan dhamaantiisa ay keeneen oo anay xabad ka qaadan, waxaa u dambeysay baadhistii bacadlaha Burco oo dhamaan wixii yaalay ee dhaqaale aha ee lacag, Dahab iyo dhar ahaa aanu qof kaliyihi waayin shay oo sidiisii loogu wada yimi.

3. aniga I hoosyimaada waa haya'adda wadooyinka oo kaliya, waxaa jira hay;ado madax banana oo madaxweynaha hoos yimaada ana madaxweynahaan la shaqeeyaa, hay'adan madaxweynaha Qaranka loo doortey dan u arkay wasiirkii markaa joogeyna ku taliyay, markii horena siday u dhisneyd ee commisionka ahaydna siday u shaqeynaysay aanay fiicnayn sida ka muuqatey Degreetada Madaxweynaha dhamaantood way ku xusanyihiin. Xaga dhaqaalaha waa anigii halkan ka sheegayay oo wiigan ayaaba 2 milyan loogu deeqay, Wadooyinkuna waxyaabaha ugu muhiimsan bay ku jiraan, waxaanse jecelahay inaan halkan ka akhriyo maalinta Salaasada wixii su'aalana kaga jawaabayaa.

4. Miisaaniyada Madaxweynaha ee aad u xustey, waxaa Horumar aan tilmaamay ee aad arkeyso ee Gidaar la dhisey leh, ee Ciidan leh, ee Gaadiid la iibiyay leh, ee Shaqo la qabtey leh waxaa lagu qabtey Miisaaniyadii loo qorsheeyay Madaxweynaha, waxaana leeyahay way ku hor-imanaysaa Miisaniyadu wakhtigeeda sug marka xisaab xidhka laguu keeno.

Md. Ibrahim Mahdi Buubaa

1. Khudbadaadu waxay ahayd mdi ka balaadhan xilka aad qaranka u hayso, markaa hadaad warbixintaadii balaadhisey, waxaana jirta xan odhaneysa Wasiirka madaxtooyada hawsha uu qabtaa way ka balaadhantahay xilkiisa, Waxa aad iftiimin naga siisaa xilka aad qaranka?
2. Qudbadaadii kumaad soo darin warbixinta Wasaarada Madaxtooyada iyadana faahfaahin naga sii?
3. Xukuumada aad ka tirsantahay waxa lagu xantaa in aad ka caga jiidaysaan doorashadii iyo diiwan galintii loo baahnaa, waana tan keenaysa in xilka hadhaw la idiin kordhiyo, iyada maxaad ka leedahay?
4. Inkasta oo anad warbixin ku filnayn aad ka soo jeedisay tahriibka, intii aad xilka hayseena way sii laban-laabatey, ilaa imikana anay muuqan wax xal ah oo ay dhiiri galiyeen qolooyin ka mida xukumaduna ay si public ah Triyada uga yidhaaheddeen in ay tagaan?
5. Arrimaha Dibada ee aad soo hadal qadey, waxaa jirta In Madaxwayanaha looga yeedhay shirar caalamiya oo aad sheegtay in uu diiday maxuu kaga duwan yahay kan uu wasiirka arimaha dibadu kuga qayb galayo Imaaraadka Carabta?

Jawaab:- Md. Xirsi X. Cali:-

1. Waxaan jecelahay inaan kaga jawaabahaaga Mudane Buubaa, xilka aan hayaa waa mid cad oo dastuuriya halkan waa la iga ansixiyay, hadaad u jeedo oo ay iskaga kaaga khaldamay Leedershipka iyo Managementga, Madaxweynuhu waa leadershipka Qaranka, ana Xafiiskiisan uga shaqeeyaa, Wasaarada Madaxtooyaduna waxay qabataa Managementgu wuxuu qabto, Madaxweynuhu wuxuu leadershipku qabto, markaa waxaan u qabtaa maamulka xafiis ee day to day activityga, Wasiiraa iga horeyay oo wasaarada soo qabtey taana intaasan kaga jawaabayaa.
2. Tahriibku waa dhiigbax dalka ku dhacey, waxaynu kaga baxaynaa dalkeena oo loo soo tahriibo oo hodon noqda taasna waynu gaadheynaa, markad leedahay numberkasa tahriibay waxaa fiican inaad keento number xaqiiq ku fadhida, waxaaanu shaqaaleysiinay dhalinyaro farabadan oo aan ku dedaalay, awoodeena dhaqaale ee dawladeed wuu xadidanyahay, marka waxaan isleeyahay tahriibta wixii aan ka qaban kareynay waan ka qabanay una yareysan meyno oo ka fadhiisan meyno, waxaa la yidhi nin geeliisii la dhacey ayaan daran mooyee orod daran lama yidhaahdo.
3. Tan shirka, Shirka ilaa hada Wasiirkii ogaalkey ma helin invitation uu kaga qeygalayo iyo nooca uu kaga qeybgalayo, markaa waa gacan uur ku jirta oo lama ogo waxa lagaga wada hadli doono oo bisha 10 ilaa 11keda ayaa war laga helayaa, Wasiirka waxaa Casuumey assistant minsterka imaaradka qaabka iyo waxa lagaga hadlayo ma wuxuu noqon doona wax technical ah siduu barigi hore u ahaa, mise shir siyaasiya, markaa waxaan leeyahay xaya cala salaah iyo salaadeeda oo wakhtigiisa aynu sugno.

4. Waxaan ognahay sida madaxweynuhu balan qaaday inaanu maalin kaliya kordhisan, waxaana leeyahay doorashadooda qabsoomideeduna Mucaarid iyo muxaafidba waa mid inoo wada taal in laga wada shaqeeyo.

Md. Maxamed Cumar Aadan Jiir:-

1. Waxaan ka fakaryay laba arimood waxaynu ognahay in caalamku laba qaybood ahaan jirey siyaasada ahaan waxaad moodaa inagu inay dhinac ka doono aqoonsiga ama la xidhiidhno, Ma ku tala jirtaan inaad xagaa bariga caalamka xidhiidh la sameysaan?
2. Mushaakil badan baa jira sanad iyo labana cid wax kuma xalin karto, biyaha oo kale waxaan ka fakaryay solution temporary ah ma sameyn karnaa oo ah booyadaha dawladu ma isticmaali kartaa si loogu sugo inta biyuhu soo gaadhayaan?

Jawaab:- Md. Xirsi X. Cali:-

1. Mudane M. C. Jiir waad u mahadnaqayaa, waa dhab Siyaasadu way iswey isbashadaa oo wey guur-guurtaa, dabcan inagana wax inoo diidayaa inaynu la guur-guurno ma jirto, wakhtigana mar jiraan meel kharaaba oo aynu ka baqaynaa inay isbadasho, laakiin ilaa hada ma jiro saaxiib aynu leenahay oo aan isleenahay saaxiib kale ku badala, wixii qaranka dantiisu ku jirtona diyaar baanu nahay.

2. Tan biyaha, way jiraan dedaalo ay wadaan qolada Wakaaladu oo ah inay sameeyaan meelo yar yar oo ay biyo ku shubaan si danyartu u isticmaalo, tan xumbaweyne inta aanu mashruucu bilaabin in marka hore la soo dhoweeyo oo la keeno meelo booyaduhu ka soo qaadi karaan sida laamiga, waxba insha'alah ka hagran meyno inta awoodayada ah biyuhuna nolosha muhiim bay u yihiin, waadmahadsantihiin.

Md. Baar Siciid Faarax:-

1. Mudane Wasiir dumarku xoriyaadka way ula siman yihiin raga dastuurku siduu xaqiijiyay wixii diinta islamku ka reebtay mooyee, waxaa jira oo dhacdey in inan Nasra Maxamed la yidhaahdo oo la yidhi waxay caydey Wasiirka maxay kaga duwantahay Raga saxafiyiinta ee Journalska qoraya ee Tvyada ka hadla mise naceyb dumar baa kugu jira Wasiir?

2. Somaliland waxaa jirta dhul xuduudo ah dhibaatoyin badana ka jiraan oo had iyo jeer ka dhacaan imbadan baan ku hadalnay dhulkaasi inay helaan Amblances, barigii dhoweyd ee amblaceyada hay'adu ina siisay iyo in ka horeysayba dhowr jeer baanu ku noqnoqoneey waxaa dhacdey in goboladii hore u jirey loogu daray, badhan mid baa la siiyay tiina Ceel-afweyn baa lagu isticmaalaa oo ay ku qorantahay, Dhaharna markaan u tagney oo weydiinay

nin aan iminka halkan ka sheegay wuxuu noogu jawaabey masuulkii inaan hay'aduhu ogoleyn waxaa la doonayaa inaad ka soo ansixisataan wasiirka Caafimaadka Puntland Ma Puntland baa dalka qey xukunta mise dalkaa kala qeybsan?

3. Waxaad sheegtey in la bixiyay ardey jaamacadeed oo bilaasha, anagu wakiilo ayaan ka nahay Gobolo, Gobolaaa aan ka wakiilka nahayna laguma hayo ardeydaydooda, iyadoo marka xaga dhaqaalaha la eego ay Goboladaasi waa kuwa ugu liita, Makraa Ardeyda Scholershipka Maxaa lagu saleeyay?

Jawaab:- Md. Xirsi X. Cali:-

1. Xildhibaan Baar aad baan ku salaamayaa waanad mahadsantahay, Su'aasha ugu horeysa ee Haweenka, Haweenka makaanada Dhaqankeena iyo Diinteena Islaamkuba dhigtey waa mid qiimeweyn leh oo aanan marnaba suurtagal iga ahayn in aan marnaba hoos u eego Hooyadey, Xaaskeygii iyo Walaashay oo kale, Haweenkuna marnaba ma gayaan wax xun, inanta aad ka hadashay ee Nasra Maxamed anaa dacweeyay, waxayna ku kacdey fal-fawaaxisha oo aanan fileyn inay Baar oo kale i weydiiso ama inan ku kacdo, maaha cay, Maaxa hadal afka laga yidhi oo kaliya, waxay ahayd arrin fa-waaxisha oo cadeeyeen Hay'addaha Xuquuqal insaanku, markii loo direyna aad ka dhageysateen warbaahin inay ahayd cay aad u xun oo ahayd 20 message oo kala duwan ah, taas oo ku xun shakhsiyada Qofka, Shareecada Diinta Islaamka iyo Qaranimadeen in sida ceynkaas ah loo hadla oo ah si aan iminka ii saamaxeyn inaan halkan ka sheegaa, hadaad u baahantahay inaan kuu keeno waan kuu keeni adigaa judge ka noqon lahaaye.

   Hadaad u jeedo waa hawaane maad dambiga u dhaaftid dambiga haween iyo rag waa loo simanyahay wixii galena waxay leeyihiin wax lagu xukumo, hadaad u jeedo Wasiir baad tahay awood baad u isticmaashayna umaan isticmaalin, Maxkamada baad tagey iyadoo cidina ila socon markaasaan sida sharciga sida shicibka ana meel fadhiistey iyana meel la soo fadhiisiyay, hadaad u jeedo Xirsi baad tahay oo Cayda inta waa lagu caayayaana maad iska dulqaadatid, anigu maan xidhin, anoo Abudabia ku maqan baa la xidhay oo booliiska xidhay, markii la xidhayna waxaan u imi iyadoo Xidhan oo dulman public domainkana ku jirta, una dulman in ay afka wax ka tidhi oo kaliya, laakiin aan foolxumo sameyn.

   Waxay daruuri noqotey inaan u samro oo u dulqaato wixii hadal hayn ahaa, laakiin markaan dalka imi iyadoo xidhan oo sii daayo, waxay noqoneysaa nin markuu doonana dadka loo xidho, markuu doonana sii daaya mar haday public domainka gashey, waxaan ku talagalo inaan sida sharciga maro oo intaan maxkamada tago anoo sidii qof dulman ahna anoo sharafteyda huna aan si qof caadiyana aan uga doodo.

Waxay runtii ahayd case qof sideyda oo kale Wasiira ahna inuu Maxkamada sidii qof caadiya uga doodana ficlan waa mid qariiba, waxaa fiican in wixii wanaagsan la xuso, inantu waxay tidhi wax fa-waaxisha oo maaha oo kaliya cay, Fa-xishaduna waa wax u baahan inay ciqaabka helaan si aan qofkastaa ugu dhicin, waayo xabsiyada waxaa loo sameeyay in falalkaa noocas ah lagu abaalmaro, Masuuliyada sharci baa ifareysa in qofka noocaas oo kala ah aan horgeeyo sharciga hortiisa si uu ugu edebsado sharciga hortiisa.

Waxaanse leeyahay Marwo Baar dee Haweenkey ahayd inay anshax ku dambeeyan, marka dambena inay anshax u doodaan maaha inagana reeban wixii anshax –xumo ahi, Marka anshaxumadii Cuquubadeedii baan sharciga u bandhigay, markii dambena Madaxweynahaan Cafis u weydiiyay anigu wixii sharciga ahaa baan maray oo waxaan muujinayay inaan bandhigo inaan dulmiyin oo dulmi geysan, ana waxaan u imi iyadoo xidhan, Messagekana aniga oo kaliya imesy soo dirin, Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka iyo Marwada kowaadba way u dirty.

2. Su'aasha labaad, Somaliland Xuduudaheeda iyo amblance aad Dhahar u weydiisay, Masuulka ku yidhi puntland baa loo weydiinayaa waa dambiile qaran haduu jiro, dabmiga si ijmaaciya looma galo ee khalad uu galay, Laakiin Qarankan Qorshihiisa Maaha in dhahar la qadiyo iyo Puntland loo soo maraa toona, waa in meel walba adeega ijmaaciga ahi gaadho.

3. Scholershipka, adaaba maraga furey oo yidhi inantu waa inan wanaagsan, iyadaana gacanta ku haysa, ana ilaahay hortiisa ayaanu u qireynaa inay tahay inan wanaagsan, Scholershipkana qaabka loo bixiyaa waa Merit oo ah derajada lagu helo oo ah sida loo kala sareeyo.

Md. Maxamed Saalax Cige:-

1. Arrimaha Gudaha, waxaad sheegtey in arrimaha guduhu aad u fiicantahay marka loo eego barigii hore, waxaana jirta in xataa falalka dambi ee iminka dhacaa ka badan yihiin kuwii hore oo dhacdo marar badan falal dambiyo dil ah oo aad moodo in ula kac loo sameeyo cidii dambiga geysatayna aan loo qaban, waxaa kaloo nabadgalayada dhib ku ah madaxweynaha oo cafis u fidiya dad falal dambiyo u xidhna oo marka loo soo daayo sameya falalki hore looga bartey, arrimahas waxaad moodaa in aanay warbixintaada ka muuqan markaa side ayay u isu wafaqayaan?

2. Maxaad ka warheysaa sida cadaalada loogu qeybiyo ceelashaa?

3. Shirarkii hore ee aynu ka qeybgalnay laba mabda' ayaa markast yaaley labadaa mabda'a oo kala ah in markasta ay Somaliland ku adkaysato gooni isu taaga Somaliland waa muqadas halka Somalia ka leedahay midnimada Somalia ay iyana muqadas tahay mar kaa miyaanay ahayn gacmo daalis mar hadii aanay

labadaa mabda aanay marnaba isu imanayn? Ama maxa micno ah ee ay samaynayaan in shirar kaa laga qayb gala?

Jawaab: - Md. Xirsi X. Cali:-

1. Xil dhibaan maxamed saalax aad ayaad ugu mahad santahay su'aalahaaga hadii aan u galo su'aasha ugu horaysa ee ahad amniga iyo gudaha halka aad leedahay danbiyadu way kordheen sida aan warbixinta ku sheegay way yaraadeen waxaanan keen xog- ururin xaqiiqo ah hadaad wax aad ku beeninayso haysana waad ii keeni kartaa, lakiin 40 dil ayaa ka dhacay sida aan xusay halka aad xustay waa la waayay oo lama qaban 40 dil kaa waxaa aan wali lahayn oo la baadi goobayaa wali inta kale waa la hayaa waxaanad ka xaqiijin kartaa hay'adaha Amniga ee qaabilsan waxaa kale oo aan si barbardhigay sanadii hore oo aad ka arki karto in ay yaraatay oo ay ahayd 70 dil sanadii hore hadan 40 dil oo xogo dhab ay tahay.

   Sida aan horayba u sheegay waxay ciidamadu ku amranyihiin dabiilaha guri ama meel kalaba ha ku soo qabtaane in ay qabtaan waxaana xusid mudan maahan danbiga ay baadi goobayaan mid sahlan waayo waa falal aad u daran oo qaraxyo dhacaya ka horeeya markaa ma beensan kartid waa sucuritiga oo kuleh qofkii wax qarxinayay halkaas ayuu ku jiraa waa in ay soo qabtaan waayo waa qof khatarku ah amaanka waana in la soo qabtaa waayo ma odhan karno eeyar ku garaaca oo ha dhibna dadka waayo waxaa tusaale kuu ah dhacdooyinkii dhacay ee midna laga dilay midna laga dhaawacay markaa ma haboona in aan ciidamadeena ku khamaarno iyada oo la leeyahay meeshaa ayuu qarax ka imanayaa takale wixii disibiliin iyo tabar ahna waan u da'daali doona insha allaah.

2. Ceelasha biyaha waxaa cusid mudan cadaalad ma loo qaybiyay su'aashaa waxaa idin hor imanay wasiirkii macdanta iyo biyaha oo ka jawaabi doona, lakii wixii riport ah ee madaxwenahay soo gaadha ee aan arko waxaa ku cad in biyaha loo kala qorsheeyo dhulku sida biyaha uu u kala leeyahay ama u kal dhaw yahay ama u kala sahlayahay waxaanan leeyaha waar harag adhi ii kac mooyee iga durug malahan ee waxaan leeyahay waxaan helay ayaa yar ee ha loo dulqaato waxaan rajaynayaa in insha alaahu dalka oo dhami biyuhu gaadhi doonaane

Cawad Cali Maxamed
Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl